



DHINACAN U LUGEE

• TALOONYINKA BADBAADADA DADKA LUGEYNAAYA •



Baro talooyinka badbaadada iyo sharciyada dadka lugaynaya kuwaas oo caawinaya badbaadada dadka lugaynaya Washington.

DHAMMAANTEEN WAXAAN LEENAHAY DOOR AAN KA CIYAARNO SIDII AAN ISU ILAALIN LAHAYN MIDBA MIDKA KALE.

DADKA LUGEYNAYA

Raac oo wadaag talooyinka badbaadada ee hoos ku qoran:

DARAWALIINTA

- 1. Dami ama iska saar tignoolajiyada:** Ha noqon qof lugeynaaya oo mashquula.
- 2. La samee xidhiidh indhaha ah dareewaliinta ka hor intaadan gudbin:** Don't walk until all traffic stops.
- 3. Isticmaal Waddada hareerteeda (side walk), haddii ay suurtagal tahay:** Haddii wadada hareerteeda aan la heli karin, ku soco waddada dhinaceeda, adigoo u jeeda gaadiidka kugu soo socda.
- 4. Isticmaal waddo-goosyada -La-Lugeeyo (crosswalk) ama isgoosyada:** Intii aad ka gudbi lahayd bartamaha waddada.
- 5. Eeg Bidix, Midig, Bidix:** Joogso, oo mar kale ka eeg bidix, midig iyo bidix gadiid KA HOR inta aanad goynin wadada.
- 6. Badbaado Ahow, Ahow Mid La Arko:** Dareewaliintu waxay u baahan yihiin inay ku arkaan si ay kaaga fogaadaan - xidho dhar dhalaalaya iyo/ama milicsi leh, oo isticmaal toosh habeenkii.
- 7. Ka Digtoonow:** Marka aad hor marayso dariiqo hore ee wadada guryaha ka soo baxda, luuqyada, ama gaadhiga gadaashiisa, ka digtoonow baabuurta laga yaabo in ay gadaal u soo baxayaan. Fiiri nalalka gadal-u-soo-baxida, dhegayso guuxa injiinka, oo fiiri in dareewalkii ku jiro baabuurka.

- 1. Joogso waddo-goosyada -La-Lugeeyo (crosswalk):** Isgoys kasta waa waddo-goosyada -La-Lugeeyo (crosswalk) — [Waa sharci](#). Dareewaliintu waa inay u istaagaan dadka lugaynaya isgoosyada, hadday tahay meel aan calaamad lahayn ama mid calaamadaysan.
- 2. Taleefoonka Hoos Dhig:** Isticmaalka taleefanka gacanta oo gacanta lagu hayo iyo qorista (texting) waa ka mamnuuc dhammaan dareewallada Washington.
- 3. U Hogaansan Sharciyada Taraafikada:** Adeec dhamaan sharciyada taraafikada. Fiiri gaar ah u yeelo xaddidaadaha xawaaraha lagu dhejiyey ee [aagagga dugsiyada](#).
- 4. Feejignow:** Ka fogow wadista mashquulka ah ama wadista cilladaysan.
- 5. Isticmaal Taxadir:** Dareewal kasta oo baabuur waa in uu isticmaalaa taxadar si uu uga fogaado in uu ku dhaco qof walba oo lugeynaya waddo kasta, waana inuu bixiyaa digniin isagoo garaacaya hoonka marka loo baahdo.

[BIT.LY/44RRUPA](https://bit.ly/44RRUPA) >>

